

Augusto 21, 2018

Tixraac: Habraacka Ogaysiiska Joojinta Xaq-yeeladka Raacida Gaadiidka Metro Mobility

Hadii aad horey u qabsatay balanta xaq u yeeladka ah fadlan faraha ka qaad ogaysiiskan

Nasiib-darro, waqtigii loo qabtay in lagu soo xareeyo codsigaaga Metro Mobility waa la dhaafay. Si aan u dhameeyno hawsha codsigaaga, waxaan kaa rabnaa in aad ka qayb qaadato Qiimeynta adigoo xaadir ah la sameeynayo ee la cadsaday. Maadaama aadan balan qabsan aadana ku soo dhameynin qiimeyntii muddadii 90 ka cisho ee la rabay in lagu soo dhameeyo, ma sii wadi karno hawsha codsigaaga.

Qiimeyntan waxaa loogu tala galay in lagu soo aruuriyo akhbaar muhiim ah, oo gaar u ah adiga iyo xaaladaada caafimaad ama wixii lagaa helay, kuwaa oo naga caawinaya anaga in aan ogaano xaq u yeeladkaaga uu dhigayo sharciga dowlada dhexe.

In kastoo qiimeyntani aysan ahayn baaritaan, waxaan u baahanahay in aad nala shaqeyso, oo aad ama adigu timaado ama qof qoyskaaga ahi uu yimaado qiimeynta si si sugar loogu fahmo xaaladaada caafimaad iyo wixii lagaa helay, iyo sidoo kale awoodaada quseeysa raacida gaadiidka Metro Mobility.

Hadii codsigaaga lagu helo mudadda **90 cisho ah gudaheeda**, waxaan kuu qaban karnaa balanta qiimeynta ah.

Si laguugu qabto balanta qiimeynta ah:

Wac **651-602-1111**

Mahadsannid,

Qiimeeyaha ADA
Metro Mobility